

# QORSHABA JOOGTADA AH EE GAROONADA DIYAARADAH (SAMP)

## QORSHAYNTA SI LOO HABEEYO KOBACA GOBOLKEENA

Waxaa la filayaa in gobolka Puget Sound ay ku kordhaan hal milyan oo qof marka la gaaro 2035. Qorshaha joogtada ah ee garoonka diyaarada (SAMP) waxa uu u adeegaa sidii qorshe loogu samayn lahaa horumarinta garoonka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA), isagoo hagaya naqshadaynta iyo horumarinta istaraatijiga ah si loo daboolo baahida mustaqbalka.

**BADBAADADA TAARIKHDA:** 21-ka Oktoobar

Qabyo-qoraalka NEPA EA waxa la daabici doonaa Oktoobar 21, 2024, iyadoo mudada faallooyinka dadweynaha ay ku egtayah Disseembar 5, 2024. La soco wixii ugu dambeeyay ee ku saabsan SAMP oo baro sida looga qayb galoo:

[samptenvironmentalreview.org](http://samptenvironmentalreview.org)



Marka laga sootago tixgelinta saadaasha baahida rakaabka iyo xamuulka, SAMP waxay qiimeysaa tas-hiilaadka hadda jira, kaabayaasha, iyo hawlgallada-iyadoo la eegayo xaaladaha mustaqbalka ee shanta, 10 ka iyo 20 ka sano ee soo socda. Shaqada qorshaynta waxaa loo sameeyay in lagu waafajiyo yoolalka joogtaynta iyo hufnaanta tamarta ee dekeda, oo ay ku jiraan waxa la dhisi doono, sida loo dhisi doono iyo sida loo maamuli doono, dhammaantood waxay taageerayaan waxqabadka joogtada

### SEA marka loo eego tirooyinka (2023):

- 50.8 milyan oo rakaab ah • 35 Diyaaradood • 93 goobood oo gudaha ah oo toos ah iyo 30 goobood oo caalami ah
- Garoomada diyaaradaha ee Maraykanka ayaa helay darajada ugu sareysa ee Skytrax's World's top 100 Airports 3 years in a row sadex sano oo isku xigta



## QIMAYNTA DEEGAANKA EE MASHAARIICDA XILIGA DHAW EE SEA SAMP

SAMP waxaa la dhameystiray sanadkii 2018. SAMP kadib, Dekedda ayaa aqoonsatay 31 Mashruuc oo Xilliga Dhaw ah (NTPs) waxay dhameystirtay habka sahaminta dib u eegista deegaanka (2018). Hadda, Xeerka Siyaasada Deegaanka Qaranka ee Siyaasadda Deegaanka (NEPA) ee dib u eegista deegaanka ayaa socota, iyadoo la filayo in dokumentiga NEPA ee qabyada ah la sii daayo Oktoobar 21, 2024. Marka habka NEPA la dhameystiro, dib u eegista Xeerka Deegaanka ee Gobolka (SEPA) ayaa raaci doonta.


SAMP's 31 NTP-ayaa lagu taliyay waxay hagaajin doonaan hufnaanta, badqabka , gelitaanka garoonka, iyo tas-hiilaadka taageerada shirkadaha diyaaradaha iyo garoonka dayuuradaha. Hadii NTP la ansixiyo, waxaa la dhamaystiri doonaa ama ay dhismuhu socon doonaa ilaa 2032.

NTPs waxaa kamid ah

- Terminaal labaad oo leh 19 albaab oo dheeraad ah
- Jid bas oo sare looqaaday oo leh saldhigyo isku xira xarunta baabuurka kirada, Tarminaalka cusub, iyo tarminaalka wayn
- Xarumaha xamuulka si loo daboolo koritaanka xamuulka hawada
- Waddooyinka garoonka diyaaradaha ee toosan
- Cusboonaysiinta garoonka diyaaradaha si loo horumariyo badqabka iyo waxtarka
- Kaabayaasha Baarkinka cusub
- Tas-hiilaad dheeri ah oo loogu talagalay shidaalka duulimaadyada waara

Dib u eegista deegaanka waa habka lagu qiimeeyo mashruuca iyo saameyn taageerada ee suurtagalka ah. NEPA waxay ku waajibinaysaa hay'adaha federaalka inay qiimeeyaa saameyn taageerada ee ficiil iyo inay bixiyaan fursado loogu talagalay ka-qaybgalka dadweynaha. Qiimaynta Deegaanka (EA) ayaa la diyaariyaa si loo go'aamiyo haddii ficiil federaal ah uu yeelan doono saameyn weyn. Ficiil kasta oo aan si gaar ah loo kaaftoomin oo aan u baahnayn Bayaanka Saameyn taageerada (EIS), ama leh saameyn aan la hubin, ama leh arrimo deegaanka oo aan la xalin, waxay u baahan tahay diyaarinta EA.

# JADWALKA DARAASADDA DEEGAANKA



## KA QAYBGALKA DADWEYNAHA

Dekadda waxaa ka go'an hab la heli karo, oo la fahmi karo habka faallooyinka dadweynaha. Marka 45-ka maalmood muddada faallooyinka dadweynuhu bilaabato Oktoobar 21, 2024, xubnaha dadweynuhu waxay awoodi doonaan inay dib u eegaan maclummaadka lagu turjumay lix luuqadood oo ay soo gudbiyaan faallooyinka inta lagu jiro muddada faallooyinka kulan dadweyne, khadka tooska ah, iimaylka, ama boostada caadiga ah. Dukumeentiga waxaa laga heli karaa mareegaheena iyo maktabadaha dadweynaha ee Burien, Des Moines, Federal Way, SeaTac, iyo qaar kaloo badan.

## KULAMADA DADWEYNAHA



### KAYDI TAARIKHDA KKULAMADA DDADWEYNAHA EE AAN QABANO

Ku soo biir kulammadeena dadweynaha si aad u gudbiso ra'yiga dadweynaha:

- Kulamo dadweyne ayaa lagu qaban doonaa Burien, Des Moines, Federal Way, iyo SeaTac
- Taariikhaha shirarka dadweynuhu waxay noqon doonaan Noofambar 12, 13, 14, iyo 16
- Waqtayo gaar ah iyo goobaha soo socda

Faallooyinka rasmiga ah waxaa lagu soo gudbin karaa qof ahaan mid ka mid ah afarta shir ee dadweynaha, iimayl ahaan, boostada, ama mareegta SAMP marka xilliga faallooyinka dadweynuhu furmo Oktoobar 21.

Ka eeg shabakadeena maclummaadkii ugu dambeeyay: <https://www.sampnvironmentalreview.org/>

